



Kharashka iyo Sharciga Habraaca Dabagalista

Aqoonsiga Ceymiska:	1400.01	Soosaarista #:	18
Sababta	Qaansheegad		
Xafiiska la Socda	Agaasimaha maareynta dakhliga, qareenka guud		
Taariikhdiis Asalka Kharashkan:	10/13/2005		
Taariikhdiis Soosaarista:	09/24/24	Dibu-eegista Sannad Kasta	
Taariikhda Dibu-eegista Xigta	09/01/25		

Helista Kharashka:	<p>Marka la iska rabo kharashka, Children's Minnesota waxay bukaanka/dammaanadqaadaha u weydiineynaa si leh sharaf, karaamo iyo xushmad; kharash sax ah ayaan u dirnaa; oo waxaan marka hore si fiican ugu dedaalnaa daryeelka caafimaadka. Habraacaas waa sida uu isbitaalka Children's MN ku raadsado kharashka ilmaha ku baxa si aan uga sii shaqeyno hawlaha caafimaadka. Uma dulqaadan karno hadal kasta oo noqon kara afxumo, dhibaato, qeylo, been, khiyaamo, ama wax kasta oo la mid ah ama in dhaqanxumo lagula kaco shaqaalaha Children's MN marka ay bukaanka weydiinayaan kharashka caafimaadka.</p>
---------------------------	--

Baaxad-ahaan:	Habkan ah helista kharashka waxaan u raacnaa bukaanka/dammaanadqaadaha oo waa sida lagu sii bixiyo lacagaha waaxyaha adeegyada bukaanka ee Children's MN (isbitaalka, dhakhtarka, daryeelka guriga, iyo xirfadleyaasha takhasuska ee looga yeerto meelaha kale).
Ujeedo:	In la raaco hal qaab oo ah habka kharashka looga helayo bukaanka/dammaanadqaadaha, iyada oo la waafajinayo talooyinka heshiiska ee u qoran Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota, iyo in si sharci loo raaco Sharciga Canshuuraha Dalka Qeybta 501(r) iyo Xeerhoosaadka Minnesota ee 144.587-589.
Qeexid:	
Cabasho:	Wixii ah xiriirka bukaanka/dammaanadqaadaha ee keena walaac ah habdhaqanka Children's MN ama xafiis kale oo u xilsaaran Children's MN oo lagala hadlayo kharash la iska rabo, ama marka lala hadlayo shirkad qareen oo isbitaalka uga shaqeysa helista kharashka ee Children's MN.
Kaalmada Kharashbixinta:	Children's MN waxay haysaa barnaamijyo caawimaad u ah bukaanka/dammaanadqaadaha, sida qiimadhimista xaaladaha adag iyo qiimadhimista dadka aan haysan ceymiska. Sida ay qoysasku xaqa ugu yeelan karaan kaalmada kharashbixinta waxa ay ku xiran tahay dakhliga, tirada qoyska, sida ay deynta u bixin karaan iyo/ama kharashbixinta ceymiskooda. Tirada qoyska waxaa loo tixgelin doonaa sida uu sharciga dhigayo.
Si-kooban Habraaca Kharashbixinta:	Faahfaahin kooban oo ah shuruudaha xaqu-yeelashada, habraaca codsiga iyo kaalmada lagu heli karo marka loo eego sharciga kaalmada kharashbixinta.
Waxqabadka:	

<p>Habka Wadahadalka Shaqaalaha iyo Bukaanka:</p>	<ol style="list-style-type: none"> 1. Diiwaangelinta ka hor, diiwaangelinta, ama marka ilmaha la seexinayo, Children's MN: <ol style="list-style-type: none"> a. Waxay aad ugu dedaalaan in ay ogaadaan ceymiska bixinaya adeegyada iyo daaweynta loo sameyn doono bukaanka; b. Waxay aad ugu dedaalaan in ay ogaadaan bukaanka xaqa u yeelan kara kaalmada kharashbixinta iyadoo loo eegayo sharciga Kaalmada Kharashbixinta ee Children's MN; iyo c. Haddii uusan bukaanku haysan ceymis, Children's MN: d. Waxaa loo sheegaa in uu la kulmo la-taliye ku caawinaya codsiga kaalmada; iyo e. Waxaa bukaanka loo eegaa inuu xaq u yeelan karo kaalmada ilaa 30 ciso daaweynta ka dib. 2. Waxaa masuuliyad ah bukaanka/dammaanadqaadaha in laga helo macluumaad sax ah marka lala hadlo ama marka ballan loo sameynayo/wakhtiga diiwaangelinta. Waa in ay Children's MN koobbi ka qaadan karaan kaarka ceymiska, si ay uga helaan macluumaadka ceymiska caafimaadka ee uu gobolku bixiyo. 3. Bukaanka/dammaanadqaadaha markay xaq u yeeshaan kaalmada bixinta lacagta ee Children's MN waxaa habka codsiga u soo sheegaya shaqaalaha Children's MN. 4. Shaqaalaha Children's MN ee bukaanka ula xiriira sida tooska ah waxa ay la socdaan wixii sannad kasta ku cusub kaalmada kharashbixinta ee Children's MN. Waxyaabaha ay la soconayaan waxaa ka mid ah barnaamijyada kala duwan ee loo hayo bukaanka/dammaanadqaadaha ee Children's MN, iyo siday bukaanka/dammaanadqaadaha ku heli karaan macluumaad ay ku soo gudbin karaan codsiga kaalmada kharashbixinta. 5. Children's MN waxay dadka u diraan waraaqo iyagoo eegaya sharciyada Kaalmada Kharashbixinta oo kooban oo fudud. Qoraal fudud oo kooban ayaa la siiyaa qoysaska oo dhan wakhtiga diiwaangelinta. 6. Sharciyada kharashka iyo helitaankiisa, codsiga iyo qoraal fudud oo la soo turjumay ayaa la siiyaa dadka ay yar tahay Aqoontooda Afka Ingiriiska. 7. Waraaqaha ah qaansheegadka lacagta caafimaadka ee bukaanka waxaa ku qoran ugu yaraan macluumaadka soo socda: <ol style="list-style-type: none"> a. lambar ah magaalada ama mid ah lacag-la'aan oo la weydiin karo su'aalo ama cabasho; b. cinwaan ay bukaanku u soo qori karaan wixii ah su'aalo ama cabasho; c. raadraacid ah helitaanka kaalmada kharashbixinta ee Children's MN; iyo d. macluumaadka soo socda, oo la mid ah cabbirka iyo qoraalka kale ee ah faahfaahinta, ee ku saabsan Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota: "Haddii aad dareento in aan xal loo helin walaac aad qabto, fadlan marka hore la soo xiriir xarunta adeegga macaamiisha oo noo oggolow in aan isku dayno in aan xal u helno walaacaaga. Haddii aan walaacaaga waxba lagu qaban, waxaad la xiriiri kartaa Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota, oo waxaad kala xiriiri kartaa taleefanka (651) 296-3353 ama 1-800-657-3787."
<p>Habraaca qaansheegadka Children's MN</p>	<ol style="list-style-type: none"> 1. Bukaanka/damaanadqaadaha aan ceymiska haysan: <ol style="list-style-type: none"> a. 5 maalmood ka dib marka isbitaalka laga baxo haddii aan ceymis laga hayn waraaq ayaa loo diraa bukaanka/dammaanadqaadaha si loogu sheego lacagta laga rabo, oo waxaa laga codsadaa ceymiska iyadoo loo dirayo codsiga kaalmada kharashbixinta ee Children's MN si ay ula soo xiriiri karaan iyo sida kaalmada loo codsado iyo macluumaad kooban oo fudud. b. Haddii bukaanka/dammaanadqaadaha ay ku soo jawaabi waayaan 30 maalmood iyo mar labaad 60 maalmood, waxaa bukaanka/damaanadqaadaha loo soo dirayaa qaansheegadka. Qoraalka

	<p>waxaa ku jira macluumaadka lagu helayo kaalmada kharashbixinta iyo lambarrada taleefannada lala soo xiriiri karo.</p> <ol style="list-style-type: none"> c. Haddii bukaanka/masuulku noogu soo jawaabi waayaan ka dib ilaa 3 waraaqood, ogeysiis ah kama-dambeys ayaa loo dirayaa bukaanka/damaanadqaadaha si loogu sheego in loo sii gudbin karo xafiis dabagala lacagta isbitaalka d. Bukaanka/damaanadqaadeyaasha waxay geli karaan qorshe ah lacagbixinta marba qaar. Shuruudaha waxay ku saleysnaan doonaan kharashka la rabo iyo baahida qoyska. <p>2. Bukaanka/damaanadqaadaha ceymiska haysta:</p> <ol style="list-style-type: none"> a. 1-maalin ka dib lacagbixinta ceymiska, waraaq ayaa loo dirayaa bukaanka/damaanadqaadaha haddii ay jirto lacag harsan oo uusan ceymisku ka bixineyn. b. Haddii bukaanka/damaanadqaadaha ay ku soo jawaabi waayaan 30 maalmood iyo mar labaad 60 maalmood, waxaa bukaanka/damaanadqaadaha loo soo dirayaa qaansheegadka. Qoraalka waxaa ku jira macluumaadka lagu helayo kaalmada kharashbixinta iyo lambarrada taleefannada lala soo xiriiri karo. c. Haddii bukaanka/damaanadqaadaha noogu soo jawaabi waayaan ka dib ilaa 3 waraaqood, ogeysiis ah kama-dambeys ayaa loo dirayaa bukaanka/damaanadqaadaha si loogu sheego in loo sii gudbin karo xafiis dabagala lacagta isbitaalka. <p>Macluumaad Kale:</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Children's MN marna ma sameyn karaan waxyaabaha soo socda markay go'aaminayaan xaqu-yeelashada bukaanka ee kaalmada kharashbixinta: <ol style="list-style-type: none"> a. In ay dadka ku qoraan ama ku khasbaan qorshe ah lacagbixinta bil kasta; b. In ay wax ka beddelaan shuruudaha qorshaha lacagbixinta bil kasta; c. In ay bixiyaan ama dadka siiyaan codsiyo ah amaah ama helista deynta; d. In ay bukaan u gudbiyaan shirkado dabagala helista qaansheegadka; e. In ay daryeelka caafimaadka ilmaha ugu diidaan lacag hore oo ay ku lahaayeen awgeed; iyo f. In ay kaarka amaahda dadka uga qaataan lacagbixin ka badan \$500 oo ay ku lahaayeen 2. Wixii ah qiimadhimis kasta oo loo garto bukaanka/damaanadqaadaha oo ay sababteedu tahay sharciga kaalmada kharashbixinta ama qiimadhimista ilmaha aan ceymiska haysan waxaa loo tixgelinayaa marka bukaanka/qoyska loo oggolaado kaalmada. 3. Qoysaska ka qeybgalaya barnaamijyada wadaagista kharashka iyadoo aan loo eegeyn qiimadhimista loogu tixgelinayo macmiil ahaan ma heli doonaan qiimadhimis guud oo ah kharash ka badan intii lagu lahaa. Tusaaleyaasha barnaamijyadaas, ma aha kuwa ku kooban kuwa ah samafalka ee kala ah Samaritan Ministries, Liberty Mutual, Medi-Share, iwm. 4. Waaxda maaliyadda ee Children's MN oo la shaqeyneysa la-taliyaha sharciga ee isbitaalka ayaa haysata awoodda kama-dambeysta ah ee lagu go'aaminayo in la sameyn karo ficil dheeraad ah oo lagu soo helayo qaansheegadka sababtoo ah dadaallo macquul ah ayaa la soo sameeyey si loo go'aamiyo haddii bukaanka/damaanadqaadaha kaalmo loo heli karo. 5. Marka codsi la soo buuxiyo oo la soo gudbiyo, isbitaalka, oo codsigaas eegaya ayaa hakin doona dedaal kasta oo ay ku raadinayeen lacagta, oo waxaa la soo go'aaminaaya xaqu-yeelashada bukaanka/damaanadqaadaha oo markaas ka dib ayaa qoraal ahaan dadka lagu ogeysiinayaa go'aanka iyadoo la muujinayo inta lagu leeyahay iyo sida loo go'aamiyey.
--	---

	<p>6. Children's MN iyo xafiisyada kala shaqeeya helista lacagta maqan waxay joojinayaan dabagalka ugu yaraan 120 maalmood laga soo bilaabo markii lacagtii koowaad la soo diray. Taas uma diideyso Children's MN in ay kharashka ka maqan xafiisyo ugu gudbiyaan 120 maalmood haddii la hubsado in la qaadi karo tallaabooyinka noocaas ah.</p> <p>7. Children's MN waxay soo celin doontaa lacag kasta oo la bixiyay oo ka badan inta ay u baahan tahay marka laga reebo lacagbixinta ah qeybta ceymisku bukaanka ku xukumo ee marka la qaabilayo bukaanka.</p>
<p>Ka-jawaabista Su'aalaha ama Khilaafka Bukaanka/Dammaanadqaadaha:</p>	<p>1. Children's MN waxay ku dedaaleysaa sidii ay ugu jawaabi lahayd su'aal kasta ama khilaafka bukaanka/dammaanadqaadeyaasha ee ku saabsan kharashka sida ugu dhakhso badan. Jawaabaha su'aalaha waxay noqon karaan qoraal ama hadal, hadba sidii ku habboon.</p> <p>a. Codsiyada lagu helo taleefanka waxaa looga soo jawaabayaa hal (1) maalin oo ah shaqo.</p> <p>b. Codsiyada lagu helo qoraalka waxaa looga soo jawaabayaa toban (10) maalin oo ah shaqo.</p> <p>2. Hawlaha dabagalka waxaa lagu hakin doonaa markay dadku ka soo codsadaan shaqaalaha:</p> <p>a. bukaanka laguma laha gebi ahaan ama qeyb ka mid ah biilka; ama</p> <p>b. meel kale oo saddexaad marka ay bixinayaan biilka; ama</p> <p>c. bukaanka oo u baahan yahay caddeyn ku saabsan biilka; ama</p> <p>d. bukaanka markuu codsaday kaalmada kharashbixinta.</p> <p>3. Children's MN ama shirkadaha kale ee dabagalka deymaha ayaa bukaanka siinaya caddeyn qoran ilaa 10 maalmood gudahood khilaafka ka dib, oo bukaanka ayaa la tusayaa deynta lagu leeyahay ama meesha kale ee saddexaad ee ka bixisay kharashkii laga rabay oo dhan.</p> <p>4. Hawlaha raadinta waxaa dib loo bilaabi karaa sodon (30) maalmood ka dib marka waraaqo caddeyn ah loogu diro cinwaankii ugu dambeeyey ee bukaanka iyadoo looga jawaabay wixii su'aalo ah ama haddii uusan bukaanku ku soo dirsan codsiga kaalmada kharashbixinta ilaa sodon (30) maalmood gudahood.</p>
<p>Xiriir ah Xaqiijinta Bukaanka/Dammaanadqaadaha deyaasha:</p>	<p>1. Ka hor intaan loo gudbin xafiisyada dabagalka daymaha:</p> <p>a. Haddii ay jirto su'aal ah qofka lacagta lagu dallacay in uu yahay qofkii la daaweeyey, shaqaalaha Children's MN ayaa xaqiijin doona magaca iyo wixii lagama maarmaan u ah in lagu xaqiijiyo in uu qofka yahay qofkii runta ahaa ee lagu lahaa lacagta caafimaadka. Shaqaalaha Children's MN ee dabagala lacagta waxa ay sidoo kale xaqiijin doonaan xog kasta oo ku saabsan meelaha kale ee saddexaad ee bixinaya ee laga yaabo in ay waajib ku tahay in ay bixiyaan daaweyntii ama adeegyadii loo qabtay bukaanka.</p> <p>b. Marka hore ee xiriir lala sameeyo ama marar ku xiga si bukaanka/dammaanadqaadaha looga helo lacagta, iyo marka ay bukaanka/dammaanadqaaduhu muujiyaan in aysan wada bixin karin lacagta oo dhan hal mar, shaqaalaha Children's MN ayaa bukaanka kala hadli doona waxyaabaha soo socda oo ay kala dooran karaan:</p> <p>i. Bukaanka/dammaanadqaadaha ayaa lacagta ku bixin kara wakhti muddeysan</p> <p>ii. Bukaanka/dammaanadqaadaha waxay codsan karaan kaalmo ah kharashbixinta.</p> <p>c. Haddii ay bukaanka/dammaanadqaadeyaashu rabaan inay codsadaan kaalmada kharashka, shaqaalaha Children's MN ayaa codsiga ugu soo diri doona bukaanka cinwaankii ugu dambeeyey oo waxay ka joojinayaan dabagalka ilaa 30 maalmood. Hawsha dabagalka waxaa dib loo bilaabi karaa, 30 maalmood ka dib, haddii aan la helin codsiga kaalmada kharashbixinta ama haddii laga soo diido codsiga.</p>

	<p>d. Children’s MN iyo xafiisyada kala shaqeeya helista lacagta maqan waxay joojin doonaan dabagalka ugu yaraan 120 maalmood laga soo bilaabo markii lacagtii koowaad la soo diray. Ficilkaasi meesha kama saarayo in la isu gudbiyo xafiiska dabagalka, balse keliya waxaa la yareynayaa xiriirkii badnaa.</p> <p>e. Children's MN uma gudbin doono bukaan/dammaanadqaade xafiis dabagal ah haddii bukaanku deynta lagu leeyahay ku bixiyo sida waafaqsan shuruudaha qorshihii bixinta lacagta ee hore ee loogu heshiiyey.</p> <p>2. Ka dib marka la isu gudbiyo xafiiska dabgalka deynta ama shirkad qareen:</p> <p>a. Haddii uu bukaan/dammaanadqaade ula soo xiriira shaqaalaha Children's MN ka dib marka lacag loo gudbiyey xafiis ah dabgalka deynta ama shirkadda qareenka Children's MN waxay xaqiijin doontaa qofka si loo hubiyo in ay jirto in bukaanku deynta ku leeyahay, oo dabadeedna waxaa la xaqiijin doonaa meelaha kale ee ah bixiyeyaasha in si sax ah loogu dallacday kharashka. Haddii uu bukaanku shaqaalaha isbitaalka siiyo macluumaad cusub oo ah masuuliyad bukaanku qaadayo, shaqaalaha Children's MN waxay la xiriiri doonaan xafiiska dabagalka deynta ama shirkadda qareenka si ay u sugaan qofka inta la soo baarayo wixii cusub. Haddii bukaanku ula soo xiriira shaqaalaha Children's MN si uu ugala xaajoodo qorshe ah lacagbixinta ka dib marka loo gudbiyo xafiiska dabagalka ama shirkad qareen, xafiiska ama shirkadda ayaa masuul ka noqon doona in ay kala heshiiyaan qorshaha.</p> <p>b. Haddii ay bukaan/dammaanadqaade ula soo xiriiraan shaqaalaha Children's MN wax ku saabsan habdhaqanka xafiiska dabagalka ee qandaraaska kula jirta Children's MN, macluumaadka walaaca bukaanka waxaa loo gudbin doonaa agaasimaha xafiiska deynta.</p> <p>c. Haddii ay bukaan/dammaanadqaade ula soo xiriiraan shaqaalaha Children's MN wax ku saabsan habdhaqanka xafiiska qareenka ee qandaraaska kula jirta Children's MN, walaaca bukaanka waxaa loo sii gudbinayaa Xafiiska Maamulka Qareenka ee Matala Children’s MN.</p>
<p>Cabashada Bukaanka:</p>	<p>1. Diiwaan ah cabashooyinka bukaan/dammaanadqaadeyaasha ayaa lagu hayn doonaa qeyb kasta oo ka mid Children’s MN ah oo si jooqto ah ayey ula xiriirayaan bukaan helista qaansheegadka caafimaadka oo waxaa la soconaya xafiiska xiriirka qoyska.</p> <p>2. Taariikhda la isku raaco ee sannad kasta, wixii cabasho ah ee la xiriira habdhaqanka xafiiska dabagalka ee ay hayso Children's MN, ama ay hayso shirkadda qareenka ee Children's MN, waa la isku soo koobayaa oo waxaa loo diri doonaa agaasimaha maamulka dakhliga, iyadoo koobbi loo diri doono Xafiiska Maamulka Qareenka ee Matala Children's MN.</p>
<p>Marka la isu Gudbiyo Xafiisyada Dabagalka:</p>	<p>1. Ka hor inta aan wax deyn ah loo dirin xafiiska dabagalka, VP ah Maareynta Dakhliga ama qofka uu u wakiisho ayaa soo diyaarin doona qoraal ah nootaayo caddeynaya:</p> <p>a. In ay jirto wax macquul ah oo lagu aamino in bukaan deynta lagu leeyahay;</p> <p>b. In meelaha kale ee bixinaya si sax ah loogu dallacay oo ay wixii deyn ah oo haray uu masuul ka yahay bukaan;</p> <p>c. In uu bukaanku muujiyo awood la'aan ah inuu ku bixiyo lacagta oo dhan hal mar ama qorshe ah marba qeyb, oo bukaan lagula taliyey codsiga kaalmada ee Children's MN iyo, haddii ay khuseyso, in la siiyey wakhti macquul ah oo uu qofku ku soo gudbiyo codsiga kaalmada kharashbixinta ee Children’s;</p> <p>d. In la buuxiyey gebi ahaan shuruudaha Xeerka Helista Dakhliga qeybta 501(r).</p>

	<p>2. Deynta ka yar \$5,000 dibu-eegista ay u baahan tahay qeybtan waa in loogu soo qanco habka caadiga ah ee qaansheegadka ee ay maraan shaqaalaha xafiiska ee Children's MN.</p> <p>3. Deynta ka badan \$5,000, agaasime ayaa sameyn doona qeybtan dibu-eegisteeda.</p>
<p>Qandaraasyada Xafiisyada Dabagalka Qaansheegadka iyo Shirkadaha Qareenka:</p>	<p>1. Children's MN waxay si toos ah heshiis qoran ula geli doontaa xafiis kasta oo deynta raadiya. Xafiiska dabagalka ee Children's MN ee helista qaansheegadka maqan waxaa ka mamnuuc ah in ay heshiis hoose la sii galaan xafiis kale iyagoon oggolaansho ka helin Children's MN.</p> <p>2. Shirkad kasta oo qareen oo la shaqeysa Children's MN oo bukaanka la xiriirta waxaa la socon doona xafiiska qareenka arrimaha guud ee Children's MN.</p> <p>3. Xafiis kasta oo ah dabagal ama shirkad qareen oo kala shaqeysa Children's MN lacagta ku maqan bukaanka waxaa looga baahan doonaa in ay u hoggaansamaan shuruudaha heshiiska ee ay Children's MN la saxiixdeen Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota.</p> <p>4. Agaasimaha adeegyada qaansheegadka ee bukaanka ayaa masuul ka ah hubinta xafiiska dabagalka iyo shirkadaha qareenka ee Children's MN in loo tababaro kaalmada Children's MN ee loogu talagalay bukaanka/dammaanadqaadeyaasha Children's MN.</p>
<p>Dibu-eegista:</p>	<p>Sannad kasta, in sharciyada loo hoggaansamo iyo/ama kooxaha xisaabinta gudaha ayaa sameyn doonaan xisaabxir ah hubinta xafiis kasta oo ku hawlan lacagaha ku maqan bukaanka si loogu hoggaansamo sharciyada la raaco. Waa in sharciyada loo hoggaansamo iyo/ama kooxaha xisaabinta xafiis dabagala ama shirkadda qareenka ee kala shaqeeya Children's MN lacagta ku maqan bukaanka waxaa looga baahan doonaa in ay u hoggaansamaan heshiiska ay Children's MN la saxiixdeen Xafiiska Qareenka Guud ee Minnesota. Natiijooyinka xisaabxirka waxa tixgalin doona Maamulka Sare ee Children's MN inta lagu jiro dibu-eegista sannad kasta ee ah heshiisyada lala galo xafiisyada dabagalka iyo shirkadaha qareenka ee kala shaqeeya Children's MN helista lacagaha ka maqan.</p>
<p>Waxyaabo Kale:</p>	<p>1. Children's MN wax ah deyn cusub oo la galay wixii ka dambeeyey Meey 1, 2005, uma gudbin karto xafiisyada keydiya diiwaanka lacagbixinta dadka.</p> <p>2. Codsiyada shirkadaha qareenka ee ay kula wareegi karaan mushaarka dadka ama lacagaha meelaha kale waxa loo gudbin doonaa maamulka si ay u soo ansixiyaan. Children's MN ma la wareegi karto mushaar ama koonto bangi oo ay leeyihiin bukaan ilaa ay marka hore soo hesho xukun ka dhan ah bukaanka ka qaba deynta.</p> <p>a. Waxaa in wax lala wareego la soo ansixin doonaa haddii aysan jirin sabab lagu rumeysto in mushaar ama lacag kale ay u badan tahay in la iska dhaafi karo oo aan lala wareegi karin.</p> <p>b. Haddii bukaanku soo gudbiyo dacwad qoran oo ah in koonto ama mushaar bukaan laga dhaafto in lala wareego, Children's MN qareenka xafiiska u raadiya lacagta waa in uusan diidin sheegasho ah in la iska dhaafto lacag lala wareegayo iyadoo aan oggolaanshaha gaar ah loo helin, kiis kasta laga helin oggolaanshaha xafiiska qareenka guud ee Children's MN.</p> <p>c. Marka kiis gaar ah loo go'aaminayo oggolaansho noocaas ah, xafiiska qareenka guud ayaa dibu-eegis ku sameynaya macluumaadka uu bukaanku soo gudbiyo oo dhan iyada oo loo eegayo sheegashada bukaanka ee ah in wax laga dhaafto.</p> <p>3. Children's MN uma qabsan karto bukaan/dammaanadqaade qeyb ka mid ah lacag haddii bukaanku siiyo Children's MN, wakhti ku habboon, macluumaad sax ah oo lacagta looga doonan karo ceymis, iyo marka ay Children's MN ku guuldarreystaan in ay kharashka u gudbiyaan ceymiska wakhtiga ugu habboon.</p>

	<p>4. Children's MN uma diri doonto wax biil ah xafiis ah dabagalka iyo meelo kale/qareenka hawlaha uruurinta marka sheegashada bixinta biilka laga sugayo bixiyaha oo ah meelo qandaraas kula jira isbitaalka.</p> <p>5. Children's MN waxay lacagaha ka maqan u gudbin karaan xafiis kale oo dabagala/qareen ka dib markay bixin waayaan ceymis ama meelaha damnad qaaday bixinta kharashka. Hase ahaatee, Children's MN uma gudbin doonto wax kharash ah xafiis dabagala/qareen ka dib marka ay soo diidaan sababta oo ah khalad ayaa jiray, oo khaladka noocaas ah waxa uu keenayaa in bukaanku masuul ka noqdo lacagta iyadoo markaan khalad jirin aysan masuul ka noqon lahayn.</p>	
Masuuliyadda Guddoonka Agaasimeyaasha:	Guddoonka agaasimeyaashka ama guddoonka guddiga loo idmaday waa in ay dibu-eegista sannadka ah ku sameeyaan sharciga iyo sharciyada khuseeya dabagalka lacagta maqan, dhimista ceymiska, iyo kaalmada kharashbixinta. Guddoonka ayaa sidoo kale dibu-eegis ku sameynaya natiijada xisaabxirka sannadka ee la xiriirta waxyaabahaas sida waafaqsan Heshiiska Qareenka Guud ee Minnesota.	
Sharci(yada) Khuseeya:	1400.02 Qareenka Bannaanka ee Dabagalka Lacagaha 1400.03 Barnaamijka Qiimadhimista Ceymis-la'aan 1400.04 Xafiiska Dabagalka 1401.00 Kaalmada Kharashbixinta	
Taariikhihii Soosaarista:	<p>Soosaarista 1: 10/13/05</p> <p>Soosaarista 2: 10/23/07</p> <p>Soosaarista 3: 01/05/09</p> <p>Soosaarista 4: 02/25/10</p> <p>Soosaarista 5: 03/01/11</p> <p>Soosaarista 6: 01/19/12</p> <p>Soosaarista 7: 06/27/13</p> <p>Soosaarista 8: 06/26/14</p> <p>Soosaarista 9: 10/01/15</p> <p>Soosaarista 10: 07/01/16</p> <p>Soosaarista 11: 09/20/17</p> <p>Soosaarista 12: 09/20/18</p> <p>Soosaarista 13: 09/09/19</p> <p>Soosaarista 14: 02/13/20</p> <p>Soosaarista 15: 06/10/21 (Lama beddelin)</p> <p>Soosaarista 16: 12/13/22 (Lama beddelin)</p> <p>Soosaarista 17: 12/13/23</p> <p>Soosaarista 18: 09/24/24 (Lama beddelin)</p>	
Koox(aha) Ansixinta		
Soosaarista #	Kooxda	Taariikhda
18	Dibu-eegista & Guddoonka Guddiga U-hogaansamidda sharciga	09/24/24
18	Guddiga Sharciga Maamulka	10/10/24